

# CODSASHADA SHATIGA DARAWALKA CAADIGA AH EE MASSACHUSETTS

Laga bilaabo Luuliyo 2023 sharci cusub oo gobolka ah ayaa u oggolaanayo dadka inay helaan shatiga darawalnimada iyadoon la eegin xaaladooda socdaalka.

## DIYAARSO OO SOO QAADO DOKUMENTIYADAN



1. **MID** ka mid ah kuwaan, aan dhacsaneyn:

- Baasaboor
- Dokumentiga aqoonsiga safaarada



2. **MID** ka mid ah kuwaan, aan dhacsaneyn:

- Dokumentiga aqoonsiga qaranka ee wadanka aad u dhalatay
- Shahaadada dhalashada (asalka ama nuqul "la xaqiijiyay", kaas oo ah nuqul rasmi ah oo leh sanjalka ama shaabada dowlada soo saartat)
- Shatiga darawalnimada (wuxuu noqon karaa mid Mareykan ama wadan kale ah)
- Shahaadada guurka ama dokumentiga furiinka (laga soo saaray Mareykanka oo kaliya)



3. **HAL** dokumenti oo muujinayo inaad ku nooshahay Massachusetts. Waa inuu wataa magacaaga iyo ciwaankaaga Massachusetts. Tusaalayaasha qaar kamid ah dokumentiyada la aqbali karo:

- |   |  |
|---|--|
| <ul style="list-style-type: none"><li>• Biilka caafimaadka ama isbitaalka (aan ka weynayn 60 maalmood)</li><li>• Rasiidhka lacag bixinta (aan ka weynayn 60 maalmood)</li><li>• Dokumentiga dugsiga: qoraalka rasmi ah ama biilka waxbarashada ee sannadkan, ama caddeyn ta diiwaangelinta (aan ka weynayn 60 maalmood)</li><li>• Dokumentiga caymiska ee sannadkan: caymiska kireystayaasha, mulkiilayaasha guriga ama baabuurta</li><li>• Warqad ka socoto hay'ad dowlaadeed (waxay noqon kartaa gobolka, federaalka ama deegaanka)</li></ul> | <ul style="list-style-type: none"><li>• Heshiiska kirada hadda.</li><li>• Bayaanka haftada guriga</li><li>• Kharashaadka guriga (gaaska, korontada, biyaha)</li><li>• Bayaanka bangiga ama bayaanka kaarka bangiga (aan ka weynayn 60 maalmood)</li><li>• Biilka taleefonka (aan ka weynayn 60 maalmood)</li></ul> |
|---|--|



4. **MID** ka mid ah kuwaan:

- Haddii abid lagu siiyay Lambarka Amniga Bulshada oo sharci ah, waa inaad bixisaa lambarka.
- Haddii aanad abid yeelan Lambarka Amniga Bulshada, waxaad:
  - Nootaayo ku hor saxeexi kartaa dokumenti dhaar ah oo dhigaya in aanad lahayn mid markii aad gudbinaysay codsigaaga fool ka foolka ah, ama wakhtigii ka horeeyay.
  - Soo qaadan kartaa "warqada diidmada" Amniga Bulshada adigoo si caadi ah u aadaya xafiiska Maamulka Amniga Bulshada. Soo qaado warqada si aad u codsatid shatiga, waa inaysan ka weynaan wax ka badan 60 maalmood maalinta aad codsatay.



5. **Turjumaadaha "La xaqiijiyay"** ee dokumenti kasta oo aan aheyn af Ingiriisi. Turjumaadaha uma baahno in la nootaayeeyo laakiin waxay u baahan yihiin inuu caddeeyo qof sida macalin labo luuqadle ah, bixiyaha adeegyada luuqada, urur bulsheed, ama nootaayada labada luuqadle ah:  
<https://www.mass.gov/doc/sample-translation-certification-format/download>



## HANAANKA CODSASHADA

Shatiga caadiga ah ee Massachusetts (ma ahan "AQOONSI DHAB AH") waxaa loo yaqaanaa shatiga "Rakaabka (Heerka D)" ee loogu talagalay gaariga iyo "Heerka M" oo loogu tallogalay mootooyinka. Qiimihiisu waa \$115.

**SHATIYADA WAREEJINTA AH:** Haddii aad haysatid shati gobol kale oo Mareykan ah oo aan dhacsaneyn ama dhacsanaa wax ka yar 1 sanno, waxaad u "wareejin" kartaa shatigaaga shatiga caadiga ah ee Massachusetts adigoon dib u galin imtixaanka qoraalka ama wadida ah. Ka bilow codsigaaga onlayn oo qabso ballan si aad ugu gudbisid dokumentiyadaada si fool ka fool ah goobta RMV ee: <https://www.mass.gov/myrmv>. Hadda ayaad ballan qabsan kartaa 1da Luuliyo iyo wixii ka danbeeya. Wuxuu sidoo kale ka soo wareejisan kartaa shatiga Meksiko, Kanada, Koonfurta Kuuriya, Jarmalka, Faransiiska iyo Tayyaan.

**SHATIYADA CUSUB:** Haddii aanad soo wareejisanayn shati, waa inaad heshaa oggolaanshaha bartaha marka koowaad. Ka bilow codsigaaga onlayn oo qabso ballan si aad ugu gudbisid dokumentiyadaada si fool ka fool ah goobta RMV ee: <https://www.mass.gov/myrmv>. Hadda ayaad ballan qabsan kartaa 1da Luuliyo iyo wixii ka danbeeya.

Maalinta ballantaada, soo qaado dokumentiyadaada. Waa inaad ka baastaa imtixaanka indhaha. Wuxuu sidoo kale ka qabso ballan si aad ugu gudbisid dokumentiyadaada si fool ka fool ah goobta RMV ee: <https://www.mass.gov/myrmv>. Hadda ayaad ballan qabsan kartaa 1da Luuliyo iyo wixii ka danbeeya!

Intaan kadib waxaad ballan ku qabsan kartaa onlayn si aad u gashid imtixaankaaga wadida. Darawalka shati haystaa waa inuu kula saarnaadaa gaarigiisa si aad u martid imtixaanka wadida. Haddii aad baastid imtixaankaaga wadida, waxaad heleysaa shatigaaga!

## WAXYAABAHA AY TAHAY INAAD DIYAARISID

- Go'aanso dokumentiyada aad qorsheyneyso inaad soo bandhigtiid ee ku jira liiska ku yaala bogga kale.
- Codso wixii dokumentiyo ah ee aad u baahan tahay laakiin aanad haysan.
- Cusbooneysii wixii dokumentiyo ah ee dhacsan.
- Hel turjumaada la xaqiijiyay ee dokumentiyada aan aheyn af Ingiriisiga.
- Hel ama daabaco dokumentiga deganaanshaha, adigoo xaqiijinaya inaysan ka weyneyn 60 maalmood oo ka bilaabmaya maalinta ballanta RMV.
- Bixi wixii tikidhada baarkinka/taraafikada, ganaaxyada ama khidmadaha ah ee lagugu leeyahay.
- Marka aad diyaarsatid dokumentiyadaada, ballan ka qabso onlayn 1 da Luuliyo iyo wixii ka danbeeya si aad ugu gudbisid dokumentiyadaada si fool ka fool ah xarunta adeega RMV ee: <https://www.mass.gov/myrmv>
- U diyaargarow imtixaankaaga qoraalka ah. Buugyarahaa darawaliinta waxaa lagu helayaa luuqado badan. <https://www.mass.gov/lists/drivers-manuals#massachusetts-driver's-manual>

La cusbooneysiiyay Juun 2023

**Wixii su'aalo ah? Soo wac khadka RMV: 857-368-9362**

ama booqo <https://mass.gov/wfma>

**La soco:**

**Facebook @DrivingFamiliesForward | Twitter @DrivingMA4ward**